



Mama Habibo waa umiliso Soomaaliyeed oo ku sugan magaalada Muqdisho, waxa ay ka hawlgashaa xiligan Xarun Caafimaad ee Hooyada iyo dhallaanka oo ay taageerto hey'adda CISP. Waxa ay umilisdani kala hadashaa hooyooyinka cusub markii ay yimaadaan xaruntaasi sidii ay daryeel iyo nafaqo ay u siin lahaayeen carruurtooda. Xabiibo waxa ay hor-taagneyd hooyooyin badan xili aan ku booqanay xaruntaasi, waxa ayna sharaxaad wanaagsan ay hooyooyinka ka

sineysay sidii hooyada iyo dhallaanka Soomaaliya ay u badbaadin lahaayeen iyadoo sawiro ka tusineysay buug ay gacanta ku heysay.

Haweeneydaan waxa ay hawshaan umiliso-nimo ku soo jirtay mudo ka badan 20 sano oo haweenka Soomaaliyeed ay ugu soo shaqeyneysay. Hada waxa ay Madax ka tahay qeybta umilinta ee xarunta caafimaad ee hooyada iyo dhallaanka ee magaalada Muqdisho oo ay taageerto Hey'adda CISP. Waxa ay sidoo kale haweyneydaan kaalin muhiim ah ka qaadataa daryeelka hooyooyinka Soomaaliyeed, iyadoo ku dhiiro-geliso haweenka inay ka faa'ideystaan adeegyada caafimaad ee lacag la'aanta ah kuwaa oo laga bixiyo xarunta, sida daryeelka hooyada dhalmada ka hor iyo kadib, tallaalka iyo adeegyada hooyanimo.

Tiro 16-kiiba hal ka ah haweenka Soomaaliyeed ayaa inta la hubo xiliga dhalmada ku dhimatay dalka Soomaaliya sida lagu qoray warbixin looga hadlay hooyooyinka aduunka taa oo la daabacay sannadii 2013-kii. Mama Xabiibo waa umiliso karti, aqoon iyo fakar dheer leh, waxa

ay ku wacyi gelisaa hooyooyinka xarunta MCH-ka.

Xili aan xaruntaasi kula kulanay waxa ay maamadani wacyi-gelin u sameyneysay 10 haween oo ay ku wacyi-gelinsay muhiimadda ay leedaahay in hooyooyinka ay yimaadaan xarunta caafimaad xiliga dhalmada ka hor iyo kedib sidoo kale ay hooyooyinka iyo carruurtooda ay ku xirnaadaan xarunta MCH-ka si ay u helaan daryeel caafimaad oo ay kamid tahay tallaalka canuga oo laga tallaalayo cudurada dilaaga ah iyo adeegyada hooyada wax u tarayo, nafaqada canuga iyo naas-nuujinta iyadoo sawiro kala duwan oo hooyada iyo dhallaanka dhibtaada ay la kuli karaan u bandhigeysay.

Waxa ay walaac ka muujisay in xiligan hooyooyinka aysan heli Karin cuno ku filan, tanina ay tahay mid wax u dhimeysaa tayada caanaha naaska hooyada taa oo mararka qaar dhibaato ku keeni karto caafimaadka carruurta. Waxa ay maamadani sheegtay in hooyooyinka marka ay ka dhaliso ilmaha, ay siiso ilmaha dhar hadiyad ah oo ay ugu talo gashay marka carruurta ay ifka ku soo biiraan.

Xabiibo waxa ay ku qanacsan tahay shaqada ay u heyso Haweenka Soomaaliyeed, " Intii collaada ay ka jirtay Soomaaliya, waxa aan hawshaan ku hayey guriga,". ayey raacisay hadalkeeda. Xabiibo waxa ay kaloo sharaxaad ka bixisay qolka ay ku fuliso hawsha dhalmada, waxa ayna hoosta ka xarriiqday in caqabado ay ka heystaan qolka ay ku hawlgasho.

Waxa ay xabiibo shaqeysaa saacado ka baxsan saacadaheedii shaqo. " Cid garan karto ma

jirto xiliga uu canuga dhalanayo". Ayey ku nuux-nuuxsatay. Waxa ay tilmaamtay in markii la xiro MCH-ka ay ku shaqeyso gurigeeda oo xiligaasi ay shaacisay inay yimaadaan hooyooyin uur leh oo xiliga dhalmada taagan.

Haweeneydaan Umilisada ah ayaa waxa ay hoosta ka xariiqday inay jirto caqabad ka taagan qolka ay hooyooyin ku umiliso oo ay ku sheegtay inuu yahay mid aad u yar, "Qolka dhalmada waxa uu kaliya qaadaa seddex sariir oo ciriir isku ah sidaa awgeed hooyooyinka ma helaan meel ay ku nastaan marka laga dhaliyo canuga," ayey raacisay hadalkeeda, inkastoo ujeedku uu yahay in adeeg la helo.

Hey'adda CISP ayaa haatan waxa ay taageertaa seddex xarumood oo adeegyada caafimaad lagu bixiyo kuwaa oo ku yaallo Magaalada Muqdisho waana kuwo noolasha dadka lagu badbaadiyo islamarkaana kor loogu qaadayo hawlaha caafimaad ee saxda ah iyadoo ay tababaro siiso shaqaalaha caafimaadka ka shaqeeyo si diirada ay u saaraan caafimaadka hooyada iyo dhallaanka, sidoo kale wanaajinta helidda daryeel dhamaystiran oo lacag la'aan ah, dhalmada hooyooyinka iyo dhalaanka cusub, iyo dhiirigelinta haweenka uurka leh si ay u soo raadsadaan daryeel caafimaad.